WAA XAQIIQ FARAHA LOOGA GUBANAYO!

Inkasto aan waqti badan ku qaadanno jikadeenna, gurigenna ma aha qolka ugu badbaada qaba. Dabka cunta kariska waa sababta 1aad ee keena dababka guryaha ka kaca iyo dababka guryaha ee dhaawacayada. Dababkaasu waxay galaafteen nolosha hal qof, iyo 23 dhaawacyo ah iyo khasaare hantiyeed oo ka badan 1.5 milyan 2007 dhexdiisa Minnesota gudaheda. Qaran ahaan dababka cunta kariska waxay sababeen kumanaan dhimasho ah iyo kumanaan dhaawacyo ah sanad kasta. Inta badan dababkasu waa kuwa laga hortagi karo. Laakiin maxan ka qaban karnaa?

1. Baro halista jikadaada dhexdeeda.
2. Baro sidii aad hoos ugu dhigi lahayd una yareyn lahay iyaga.
3. Baro jawaabta ku habboon oo aad ka bixin lahayd haddii wax khaldamaan.
4. Baro waxa la xiriira darbi-jiifka iyo sida aad ula dhaqmi lahayd.

MINNEAPOLIS EMT FIRE RESCUE

www.ci.minneapolis.mn.us/fire

Xiriir la leh

MINNESOTA PUBLIC SAFETY STATE FIRE MARSHAL

www.fire.state.mn.us

AMMAANKA JIKADA

Cunto Aan Karinno!

QAAD MASUULIYAD SHAQSIYEED

Bilow adigo xil iska saaraya ogaashaha waxa kugu wareegsan adigoo dhigaya tusaale wacan. Kani waa ku caawi doonaa kuwa kalana wuxu baddalaa dhaqammo aan ammaan ahayn taaso laga yaabo in aadan ogaanin in aad leedahay.

Habka Badbaadada cunto diyaarinta

HADDII AADAN AQOON SIDA UU U SHAQEEYO FOORNADAADA AMA MAKIINADDA CUNTADA KARISA, WEYDII QOF KALE OO KU TUSIYA INTAA AADAN ISTICMAALIN!

Nadiifin ku hay…

- ***Meesha wax lagu karinayo ka nadiifi duffanka iyo saliidda ku daadatay.***
- ***Meesha cunta lagu karinaya ha noqoto meel saafi ka ah waxyaabaha guban-og sida faashadaha, shukumannada calalada, cuntada baakadaha ku jirta iwm.***
- ***Ha u isticmaalin makiinadda cuntada dusheeda sida cabbirka kore.***

Inta aad wax karinaysid…

- ***Ka fogee xayawaanka dad-la-noolka iyo caruurta jikada meelaha cuntada lagu karinayo inta aad cuntada karinaysid.***
- ***Marna ha ka tekin cunta karsamaysa.***
- ***Gacma-gashiga gudaha u lab si aanu u guban.***
- ***Gasho gacma-dheere kula eg, hana gaarsiin dhinaca meelaha gubanaya.***

Marka ay wax khaldamaan…

- ***Isdaji.***
- ***Dabka digsiga ka qaad, adigo xiran gacma-gashiga foornada daboolka digsiga si fudud u saar islamarkaana dami makiinadda.***
- ***Dabka foornada, albaabka xir damina foornada, kana saar fiilada.***
- ***Dabka cunta-kululeeyaha, albaabka xir ka saar fiilada.***

Wicitaanka gargaarka…

- ***Hubi in qof kasta uu guriga bannaanka ka jogo lagana fakaro.***
- ***Ka wac 911 guryaha dariskaada.***
- ***Hayso dab-damiyaha 10 lb. ABC oo la saarayo iridda agteda.***
- ***Haddii dabku aanu gaarin meel ka baxsan halkii uu ka bilowaday, isticmaal dab-damiskaada adigo raacaya qaabka GUDBINTA.***

  Riix musmaarka yar, **A**bbar dabka **M**arooji gacanka

Noocyada gubashada…

- ***Darajada gubashada koobaad waa maqarka kaaso waxyeelma lakabka sare kaliya oo loo daremayo sida gubashada qorraxda oo dabacsan.***
- ***Darajada gubashada labaad waa barar iyo biyo gala sababto ah lakabyo badan oo maqaarka ayaa gubtay.***
- ***Darajada saddexaad ee gubashada waa dhammaan lakabyada iyo laga yaabe unugyada hoose oo gubtay.***

La tacaalidda gubashada…

- ***Haddiii maqaarku aanu jajabin sida darajada gubashada koobaad iyo labaad biyo qabow waa lagu shubi kara meesha si kulaylka looga qaado, hasayeeshe, haddii maqaarku uu jajabo sida daraja saddexaad, weydiiso maro qallalan oo nadiifa kuna duub dhaawaca si deg-deg ahna doono kaalmo caafimaad.***